## منزلة الشهداء والتضحية في سبيل الوطن

## Darajada shuhadada iyo in nafta loo huro dalka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

**(وَلَا تَقُولُوا لِمَن يُقْتَلُ فِي سَبِيلِ اللَّـهِ أَمْوَاتٌ بَلْ أَحْيَاءٌ وَلَـٰكِن لَّا تَشْعُرُونَ)**

**(Hana ku dhihina kuwa lagu dilo jidka Alle (Jahaadka) waa dhinteen, saas ma aha ee waa nool yihiin, laakin ma dareemaysaan)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Intaas kaddib:**

Shacabka Masar wuxuu u dabaaldagayaa maalmahan sannadguuro ka mid ah xusuusta ugu waaridda badan intuu soo jiray iyo maalin ka mid ah maalmaha Ilaahay -cazza wajalla- oo rabbigeena ku galladaystay Masar guul iyo inay soo cesheto dhulka iyo sharafta oo wada socda.

Waa xuskii guusha lixda Oktoobar ١٩٧٣-kii M. tobanka Ramadaan ١٣٩٣-kii H. dagaalka weyn waa midka ciidanka Masar uu ku muujiyay geesinimo iyo naf hurid,

waxaana soo muuqday asalka askariga masaariga ee asliga ah isagoo rummaysan Ilaahay kuna kalsoon gargaarkiisa iyo isagoo naftiisa run u sheegaya go'aankiisana uu adag yahay iyo rabaitaankiisa uu rabo siduu uga dhabeyn lahaa dantiisa iyo ujeeddadiisa.

Marka ujeeddooyinka ay noqonayaan kuwa sarreeya oo sharaf leh waxaa lagama maarmaan ah naf huridda inay noqoto mid aad qaali u ah, ma jiro wax ka qaalisan in nafta loo huro shahaado dar Alle ah, qofka wuxuu bixinayaa ruuxdiisa asoo difaacayo diintiisa iyo dhulkiisa iyo sharaftiisa siduu u helo darajo sare taasna waa darajada shahaadada.

Darajada shahaadada waa deeq rabbaani ah, iyo siismo ilaahi ah oo xagga Alle ka imaanayso, wuxuu ku galladaysanayaa Alle khalqigiisa kuwa loogu jecel yahay anbiyada iyo siddiiqiinta kaddib, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَمَنْ يُطِعِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَأُولَئِكَ مَعَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مِنَ النَّبِيِّينَ وَالصِّدِّيقِينَ وَالشُّهَدَاءِ وَالصَّالِحِينَ وَحَسُنَ أُولَئِكَ رَفِيقًا}**

(**Qofkii adeeca Alle iyo rasuulka kuwaasu waxay ahaan lajirka kuwuu u nimceeyay Alle, oo nabiyada, rumeeyayaasha, shuhadada iyo kuwa suubban waxaana u fiican rafiiq kuwaas**).

Alle doorashada uu dooranayo qof inuu shahiid noqdo waxay daliil u tahay inuu raalli ka yahay, darajadee ka sarraysa darajadan!, Quraanka kariimka wuu tilmaamay arrintaas wuxuu yiri Alle:

**{وَيَتَّخِذَ مِنْكُمْ شُهَدَاءَ}**

**(Idinkana dhigto shuhado)**

Shahiidka naftiisa ayuu u huray isduu u raalli galin lahaa rabbigiisa una difaaci lahaa dalkiisa, aakhiro ayuu ka doortay adduunka wuuna ka guulaystay shahwadiisa iyo danihiisa, wuxuu tiimbaday goobta dagaalka isagoo naftiisa u hurayo diinta iyo dalka.

Waxaa loogu hambalyaynayaa shahiidka darajadan barakaysan iibkiisa wuu ribxay, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**(إِنَّ اللَّهَ اشْتَرَى مِنَ الْمُؤْمِنِينَ أَنْفُسَهُمْ وَأَمْوَالَهُمْ بِأَنَّ لَهُمُ الْجَنَّةَ يُقَاتِلُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَيَقْتُلُونَ وَيُقْتَلُونَ وَعْدًا عَلَيْهِ حَقًّا فِي التَّوْرَاةِ وَالْإِنْجِيلِ وَالْقُرْآنِ)**

(**Alle wuxuu kaga gatay mu'miniinta naftooda iyo xoolahooda inay janno u ahaato waxay ku dagaallami jidka Alle oy waxna dili iyana la dili, waana yabooh ku sugan Tawreed iyo Injiil iyo Quraanka, yaa ka oofin badan ballankiisa Alle ku bishaaraysta gadiddii ood gaddeen kaasina waa uun liibaanta wayn**)

Maxaa ka fiican sifo ahaan oo abaalkeedu uu yahay janno, waxaa kusoo arooray xadiiska in Ummu arrubayic bintu Albaraa -Ilaahay raalli haka noqdee - iyadu waa hooyada Xaaritha bin Suraaqa waxay u timid nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - waxay tiri: nabigii Ilaahayo miyaadan iiga sheekaynaynin Xaaritha? waxaa la dilay maalinta Badar waxaa ku dhacay gamuun

dool ah, hadduu jannada ku jiro waan sabrayaa haddii si kale ay tahay oohinta ayaan ugu dadaalayaa, wuxuu yiri: "**umu xaarithoy waa jannooyin jannadada dhexdeeda, wiilkaagana wuxuu helay fardowsada ugu sarreysa**". Shahiidka dhabta ah waa kan Ilaahay u baraxtiray una huray naftiisa dar Alle, naftiisana u bixiyay siduu kalmadda Alle u kor yeeli lahaa una difaaci lahaa dhulkiisa una kor yeeli lahaa calanka dalkiisa, waxaa laga wariyay Abuu Muusaa -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: nin ayaa u yimid nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu yiri:

**"الرَّجُلُ يُقَاتِلُ لِلْمَغْنَمِ، وَالرَّجُلُ يُقَاتِلُ لِلذِّكْرِ، وَالرَّجُلُ يُقَاتِلُ لِيُرَى مَكَانُهُ، فَمَنْ فِي سَبِيلِ اللهِ؟ قَالَ: مَنْ قَاتَلَ لِتَكُونَ كَلِمَةُ اللهِ هِيَ الْعُلْيَا فَهُوَ فِي سَبِيلِ اللهِ"**

"**Nin wuxuu u dagaallamaa qaniimo, ninna wuxuu u dagaallamaa in la sheego, ninna wuxuu u dagaallamaa si loo arko darajadiisa yaa ku sugan waddada Alle? Wuxuu yiri: qofka u dagaallamo si ay u noqoto kalmadda Alle midda ugu sarreysa isagaa ku sugan jidka Alle**"

Sidoo kale shahiidka dhabta waa midka aan raalli ka noqonin liidnaanta qaab kaste ha ahaato wuxuuna diidayaa dullinimo, wuxuu ka hortagayaa qof kaste isku dayaya inuu ku xadgudbo hantidiisa ama alaabtiisa, waxaa laga wariyay Abuu hurayra -Ilaahay raalli haka noqdee - inuu yiri:

**جَاءَ رَجُلٌ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ (صلى الله عليه وسلم) ، فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَرَأَيْتَ إِنْ جَاءَ رَجُلٌ يُرِيدُ أَخْذَ مالي؟ قَالَ: « فَلاَ تُعْطِهِ مَالَكَ ». قَالَ: أَرَأَيْتَ إِنْ قَاتَلَنِي؟ قَالَ: «قَاتِلْهُ» ، قَالَ : أَرَأَيْتَ إِنْ قَتَلَنِي؟ قَالَ: «فَأَنْتَ شَهِيدٌ» ، قَالَ : أَرَأَيْتَ إِنْ قَتَلْتُهُ؟ قَالَ: «فَهُوَ فِي النَّارِ».**

"Nin ayaa u yimid rasuulka Alle wuxuu yiri: rasuulkii allow ka waran nin hadduu ii yimaado oo raba inuu hantidayda qaato? wuxuu yiri "**ha siinin hantidada**" wuxuu yiri: ka waran hadduu ila dagaallamo? wuxuu yiri: "**la dagaallan**" wuxuu yiri: ka waran hadduu i dilo? wuxuu yiri: "**waxaad tahay shahiid**" wuxuu yiri ka waran haddaan dilo? wuxuu yiri: "**naarta ayuu galayaa**".

Shahiidka dhabta ah waa kan difaaco dhulkiisa iyo sharaftiisa iyo dalkiisa, in dalka iyo sharafta la difaaco qofka muslinka dhabta ah agtiisa waa sida difaacidda nafta iyo diinta iyo hantida, maxaayeelay diinta waxay u baahan tahay dal ay ku sugnaato oo difaacaya, waxaa laga wariyay Saciid bin Zayd -Ilaahay raalli haka noqdee - inuu yiri rasuulka:

**«مَنْ أُصِيبَ دُونَ مَالِهِ فَهُوَ شَهِيدٌ ، وَمَنْ أُصِيبَ دُونَ أَهْلِهِ فَهُوَ شَهِيدٌ ، وَمَنْ أُصِيبَ دُونَ دِينِهِ فَهُوَ شَهِيدٌ».**

(**Qofkii la dilo hantidiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo ehelkiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo diintiisa ka soke waa shahiid**).

Sidaa awgeed macnaha shahaadada wuxuu ku xiran yahay huritaanka qofka naftiisa uu u hurayo dar Alle, mowqif kaste u baahan in diinta Alle lagu difaaco sidii loo kor yeeli lahaa kalmadda Alle, iyo dhulka lagu difaaco sidii loo dhowri lahaa oo cadowga looga reebi lahaa, maxaayeelay jacaylka dalka wuxuu ka mid yahay rumeysnaanta, Hambalyo shuhadada dagaalka gudbitaanka aan la illaawin, kuwaas oo dhulka Masar daahirka ah oo dhiiggooda qiimaha leh lagu waraabiyay arwaaxdoodadana xagga Alle loo qaaday kuna liibaanay raalligiisa iyo naciimka Ilaahay u yaboohay waxaan Alle weyddiisanaynaa inuu nagu daro shuhadada.

Shahaadada waxay leedahay faa'idooyin waaweyn, waxaa ka mid ah wixii Ilaahay noogu sheegay kitaabkiisa kariimka ah in shuhadada ay ku nool yihiin Alle agtiisa oona la arsaaqayo, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَمْوَاتًا بَلْ أَحْيَاءٌ عِنْدَ رَبِّهِمْ يُرْزَقُونَ * فَرِحِينَ بِمَا آَتَاهُمُ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ وَيَسْتَبْشِرُونَ بِالَّذِينَ لَمْ يَلْحَقُوا بِهِمْ مِنْ خَلْفِهِمْ أَلَّا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ * يَسْتَبْشِرُونَ بِنِعْمَةٍ مِنَ اللَّهِ وَفَضْلٍ وَأَنَّ اللَّهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُؤْمِنِينَ}**

**(Hana u malaynina kuwa lagu dilay jidka Alle kuwa dhintay, saas ma aha waxay ku noolyihiin rabbigooda agtiisa laguna arzaaqi * Iyagoo ku faraxsan wuxuu siiyay Alle oo fadligiisa ah, kuna bishaaraysan kuwaan**

**wali haleelin ee gadaashooda ah inuusan korkooda cabsi iyo murugo midna «ahyn»**).

haa way nool yihiin ma dhimanin waa la arsaaqayaa risqigoodana wuxuu ka yimid xagga Alle, waxay ku faraxsan yihiin wixii Ilaahay siiyay, jannada lagu waaro oo laga helo wax ayasan il arkin ama aysan dheg maqlin ama qalbi aadane kusoo dhicin, waxay ku bishaaraysanayaan walaalahooda u imaanaya murug iyo walbahaar ma haysto bal waxay haystaan bishaaro iyo fadli iyo nimco.

Waxaa laga wariyay Jaabir bin Cabdillaahi -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri:

**لَقِيَنِي رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) فَقَالَ لِي: «يَا جَابِرُ مَا لِي أَرَاكَ مُنْكَسِرًا»؟ قُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ اسْتُشْهِدَ أَبِي، وَتَرَكَ عِيَالًا وَدَيْنًا، قَالَ: «أَفَلَا أُبَشِّرُكَ بِمَا لَقِيَ اللَّهُ بِهِ أَبَاكَ»؟ قَالَ: بَلَى يَا رَسُولَ اللَّهِ. قَالَ: "مَا كَلَّمَ اللَّهُ أَحَدًا قَطُّ إِلَّا مِنْ وَرَاءِ حِجَابٍ، وَأَحْيَا أَبَاكَ فَكَلَّمَهُ كِفَاحًا (مُواجَهَةً لَيْسَ بَيْنَهُمَا حِجَابٌ وَلا رَسُولٌ) فَقَالَ: يَا عَبْدِي ، تَمَنَّ عَلَيَّ أُعْطِكَ ، قَالَ: يَا رَبِّ تُحْيِينِي فَأُقْتَلَ فِيكَ ثَانِيَةً ، قَالَ الرَّبُّ عَزَّ وَجَلَّ: إِنَّهُ قَدْ سَبَقَ مِنِّي أَنَّهُمْ إِلَيْهَا لا يُرْجَعُونَ" ، قَالَ: وَأُنْزِلَتْ هَذِهِ الآيَةُ: {وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَمْوَاتًا}.**

Waxaa ila kulmay rasuulka Alle - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu igu yiri: "**Jaabirow maxaad u niyadjabsan tahay**"? waxaan ku iri: rasuulkii allow, aabbahayga ayaa shahiiday wuxuuna ka tagay ciyaal iyo deyn, wuxuu yiri: "**ma kugu bishaareeyaa wixii aabbahaaga kula kulmay Alle?** wuxuu yiri: haa rasuulkii allow, wuxuu yiri: " **Ilaahay**

**waligii qof si toos ulama hadlin wuxuu soo nooleeyay aabbahaaga wuuna la hadlay iyagoon xijaab u dhexeynin**, **wuxuu ku yiri: addoonkeygiyow wax iga codso aan ku siiyee, wuxuu yiri: rabbiyow waad i noolaynaysaa mar labaad ayaana lay dilayaa Alle wuxuu yiri: waxaa iga hormaray inaan dad la celinaynin**, wuxuu yiri aayaddaan ayaa lasoo dejiyay:

**{وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَمْوَاتًا}.**

(**Hana u malaynina kuwa lagu dilay Jidka Alle kuwa dhintay**)

Waxaa ka mid ah darajooyinka shuhadada: shahiidka Alle agtiisa waxaa u yaalla lix waxyaalood: waa loo dambidhaafayaa marka ugu horreysa, wuxuu arkayaa jannada meesha uu ka gali lahaa, waxaa laga badbaadinayaa cadaabka qabriga, wuxuu ka badbaadayaa arggagaxa weyn, madaxa waxaa loo saarayaa taajka weynida, hal yaaquud ka mid ah wuxuu ka khayr badan yahay adduunka iyo waxa ku sugan, waxaa loo guurinayaa toddobaatan iyo labo xaas oo ka mid ah xuur alcaynta, waxaa loo shafeecayaa toddobaatan qaraabadiisa ka mid ah -lafdi kale waxaa kusoo arooray - ehelu baydkiisa.

Waxaa ka mid ah qaababka karaamada: in malaa'igta ay ugu hareynayso garbaheeda, waxaa laga wariyay Jaabir bin Cabdillaah inuu yiri: waxaa loo keenay

aabbahayga Nabiga asoo shahiid ah maalinta Uxud asoo lasoo jarjaray, waxaa la dhigay hortiiisa waxaan ka feyday wejigiisa dadkayga ayaa iga reebay wuxuu maqlay nabiga cod haweeney qaylinayso wuxuu yiri: **"maxaad u oynaysaa? ha ooyin malaa'igta wali garbaheeda ayay ugu haraynaysaa**"

Waxaa ka mid ah: in shahiidka uu la galayo kooxda ugu horraysa jannada galayso xisaab la'aan iyo ciqaab la'aan, waxaa laga wariyay Cabdillaahi bin Camr bin Alcaas -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: waxaan maqlay rasuulka Alle oo dhahaya:

**(إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى يَدْعُو يَوْمَ الْقِيَامَةِ الْجَنَّةَ ، فَتَأْتِي بِزُخْرُفِهَا وَرِيِّهَا ، فَيَقُولُ : أَيْنَ عِبَادِيَ الَّذِينَ قَاتَلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ ، وَقُتِلُوا فِي سَبِيلِي ، وَأُوذُوا فِي سَبِيلِي ، وَجَاهَدُوا فِي سَبِيلِي ، ادْخُلُوا الْجَنَّةَ ، فَيَدْخُلُونَهَا بِغَيْرِ حِسَابٍ وَلا عَذَابٍ ، فَتَأْتِي الْمَلائِكَةُ ، فَيَقُولُونَ : رَبَّنَا نَحْنُ نُسَبِّحُ لَكَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ ، وَنُقَدِّسُ لَكَ ، مَنْ هَؤُلاءِ الَّذِينَ آثَرْتَهُمْ عَلَيْنَا ؟ فَيَقُولُ الرَّبُّ تَبَارَكَ وَتَعَالَى: هَؤُلاءِ الَّذِينَ قَاتَلُوا فِي سَبِيلِي ، وَأُوذُوا فِي سَبِيلِي ، فَتَدْخُلُ عَلَيْهِمُ الْمَلائِكَةُ مِنْ كُلِّ بَابٍ " سَلامٌ عَلَيْكُمْ بِمَا صَبَرْتُمْ ، فَنِعْمَ عُقْبَى الدَّارِ".**

**"Ilaahay maalinta Qiyaame wuxuu u yeerayaa jannada waxay la imaanaysaa quruxdeeda iyo dhaldhalaalkeeda, wuxuu dhahayaa: aaway addoomahayga oo ku dagaallamay jidka Ilaahay oo darteyda loo dilay oo dartayda loo dhibay oo dartayda u jihaaday, gala jannada, waxay galayaan xisaab la'aan**

**iyo cadaab la'aan malaa'igta ayaa imaanayso waxay dhahayaan rabbiyow annaga waan kuu tabiixsanaynaa habeen iyo maalin waanna ku weynaynaa yay yihiin kuwan aad naga dooratay? wuxuu oranayaa Alle: kuwan waa kuwa u dagaallamay dartayda dartaydana loo dhibay, malaa'igta ayaa uga soo galayso albaab kaste "nabadgelyo korkiina ha ahaato sabarkiina dartiisa, waxaana fiicnaatay ciribta daarta**"

Waxaa ka mid ah: inay ku leeyihiin shuhadada jannada guryaha kuwa ugu fiican, waxaa laga wariyay Samura bin Jundub -Ilaahay raalli haka noqdee - inuu yiri rasuulkii Alle ayaa yiri:

**"رَأَيْتُ اللَّيْلَةَ رَجُلَيْنِ أَتَيَانِي فَصَعِدَا بِي الشَّجَرَةِ فَأَدْخَلانِي دَارًا هِيَ أَحْسَنُ وَأَفْضَلُ لَمْ أَرَ قَطُّ أَحْسَنَ مِنْهَا ، قَالا لِي: أَمَّا هَذِهِ فَدَارُ الشُّهَدَاءِ".**

"**Waxaan arkay xalay labo nin oo ii yimid waxay ila fuuleen geed waxay i galiyeen daarta ugu fiican waligay ma arag wax ka fiican, waxay igu dhaheen: tan waa daarta shuhadada**".

Sidaa awgeed shahiidka waa qofka kaliya jecel inuu usoo laabto adduunka oo mar labaad loo dilo dar Alle, sida xadiiska Anas kusoo arooray inuu nabiga yiri:

**"مَا أَحَدٌ يَدْخُلُ الجَنَّةَ يُحِبُّ أَنْ يَرْجِعَ إِلَى الدُّنْيَا ، وَأَنَّ لَهُ مَا عَلَى الأَرْضِ مِنْ شَيْءٍ إِلا الشَّهِيدُ ، فَإِنَّهُ يَتَمَنَّى أَنْ يَرْجِعَ إِلَى الدُّنْيَا ، فَيُقْتَلَ عَشْرَ مَرّاتٍ ؛ لِمَا يَرَى مِنَ الكَرَامَةِ" ، وَفِي رِوَايَةٍ: "لِمَا يَرَى مِنْ فَضْلِ الشَّهَادَةِ".**

(**qof ma jiro oo jannada galayo oo jecel inuu adduunka usoo laabto oona helaya dhulka waxa yaalla oo dhan qofaan shahiidka ahayn, wuxuu rabaa inuu usoo laabto adduunka oona la dilo toban jeer karaamada uu arkayo darteed**, riwaayo kale waxaa ku sugan "**fadliga shahaadada uu arkayo dartii**".

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Gaaridda ujeedooyinka waaweyn maalmahan waxay u baahan tahay naf huritaan ku habboon, waxaan shaki ku

jirin in sarreynta ujeeddooyinka iyo sharafta maqaasidda iyo gaaridda qaayada ay keenayso qiimaha naf huridda, waa sida uu yahay qof kaste diintiisa iyo dalkiisa u huray.

Waajibka naga saaran dalkeena qiimaha badan iyo diinteena toosan inaan ku dadaalno annagoo is kaashanayno inaan ilaalino amniga dalka inaan difaacno, cadow kaste inaan ka ilaalino iyo halis kaste kusoo wajahan, inaan u dhafarno ilaalintiisa, inaan si wada jir ah uga hortagno qof kaste ay naftiisa u qurxinayso inuu kusoo dhiirrado dalkeena, qof kaste intuu ka awoodo iyo meesha uu taagan yahay.

Hambalyo ayaan leenahay ciidankeena geesiyaasha ah oo qabsaday xarigga Ilaahay, kana run sheegay wixii ay Alle kula ballameen, iyagoo leh go'aan adag iyo yaqiin sugan waxay awoodeen inay u gudbiyaan dalkeena dhismaha iyo camiraadda, salaan ayay ku madan yihiin dhamaan ciidankeena xoogga oo geesiyaasha ah maalinta guushooda sharafta leh, waxaa laynaga rabaa kaalin kale oo ah in loo anbabaxo kobcinta iyo barwaaqada, shaqada iyo wax soo saarka, si aan caalamka ugu caddeyno dadka gudbay xariiqmada Baarliif ee adkayd ee dhexgalay dhufeysyada dabka maalinta shafarta badan inay awoodaan ubadkooda jiiridda wax kastoo adag si ay nabad iyo amaan iyo barwaaqo u xaqiijiyaan Ilaahay idinkii, inaan hal saf noqono kana dambeyno madaxdeena iyo ciidankeena

qalabka sida oo geesiyaasha ah iyo nabadsugiddeena iyo dhammaan mu'asasooyinka dowladda wadaniga ah.

**Ilaahayow ilaali Masar iyo dalalka islaanka ah nimcada nabadda iyo amaankana daa'in uga dhig arsaaq bashbash iyo barwaaqa ahna sii**